# SIYAASADA QOLKA BULSHADA

## WARBIXINTA AASAASIGA AH

Ayada oo ilaalinaysa kaalinteeda ah inay noqoto xarun bulshadu leedahay iyo meel ay iskugu timaaddo, Maktabadda Degmadu waxay Qolalkeeda Bulshada u diyaarisay ururada bulshada ee sare u qaada daryeelka bulshada sidoo kale muhiimadda koowada siiya sare u qaadista danta guud iyo daryeelka guud ee dadka bulshada katirsan guud ahaan iyo kooxo ahaanba ayaga oo la qaadanaya kulamo, siinaya siminaaro, tababaro waxbarasho ah, iyo maxfallo xiliyada aan maktabadda cidna isticmaalayn.

## UJEEDADA

Si loo bixiyo tilmaamaha isticmaalka ku haboon Qolalka Maktabadda Bulshada ee ay leedahay Maktabadda Degmada San Diego.

Qolalka Bulshada ee laamaha Lincoln Acres iyo Encinitas waxaa ku shaqaysa waaxda jardiinada iyo Madadaalada ee Degmada San Diego iyo Magaalada Encinitas, sida ay u kala horeeyaan, waxana lagu maamulaa siyaasado kala duwan oo ururadaasu leeyihiin. Sii qabsashada qolalka ayaga ayaa si toos ah looga qabsadaa.

## SIYAASADDA

Laamaha SDCL waxay raadinayaan kooxaha iyo ururada bulshada si ay uga caawiyaan kordhinta saamaynteena ayada oo la adeegsanayo istiraatiijiyad wadashaqayn ah. Ururada qabta adeegya bulshada iyo kuwa ijtimaaciga ah waxaa kamid noqon kara koleejyada, kooxaha bulshada, ganacsiyada, hay'adaha diimaha iyo kuwa kale ee doonaya in la sameeyo farqi wadajir ah. Ganacsiyada iyo wakaaladaha faa'iido doonka ah ee aan wadashaqaynta la lahayn Maktabadda xaq uma lahan inay qabsadaan qolalka kulamada.

**TILMAAMAHA**

Qiyamka Qolka Bulshada

1. Qolalka Bulshada waxaa isticmaali kara ururada iyo kooxaha ka shaqeeya shaqooyinka waxbarashada, dhaqanka, garaadka, ama sadaqada, sida hay'adaha dowladda, ururada ka shaqeeya adeegyada bulshada iyo kuwa ijtimaaciga ah, iyo naadiyaasha maxaliga ah. Doorosho lama ogola.

2. Dhammaanba barnaamijyadu iyo kulamadu waa kuwo u furan bulshada guud ahaanba lagumana koobi karo xubnaha ururka madasha maalgalinaya, marka laga reebo xaaladaha soo socda.

   a) Hay'adaha dowladda, marka codsigooda laga aqbalo.
   b) Ururada bulshada marka wakaaladda ku shaqada leh ka aqbasho.

3. Qolalka bulshada diyaar uma ahan in lagu qabto xafladaha diimaha.

4. Dhammaanba kooxaha waxaa loola dhaqmi doonaa si iskumid ah marka ay qabsanayaan, marka laga reebo waxyaabaha soo socda oo muhiimad leh:

   a) Madal Maktabaddu maalgalisay, oo ay kujiraan barnaamij/waxbaarsho cilmi ah oo maktabadda khuseeya.

   b) maktabaddu wxaay marmarka qaarkood la gali kartaa heshiis isticmaal dhinacyo kale kuwaas oo muhiimad siinaya wakhti kooban (sida, muddada qorshaynta mashruuc u baahan dhegaysi dadweyne oo badan).

5. Guud ahaan, qolalka waxaa la heli karaa kaliya sacadaha maktabaddu u furantahay dadweynaha. Qolka Bulshada waa in la baneeyaa 30 daqiiqo kahor wakhtiga Maktabadda la xiraayo. Si kastaba ha ahaatee, qolalka bulshada ee laamaha ku yaala ayay dhici kartaa in la heli karo xiliyo kale taasoo keenaysa in qolka bulshada lga xiro maktabadda inteeda kale. Fureyaasha qolalkaan, iyo tilmaamaha, waxaa loo nixin doonaa si waafaqsan Siyaasadda Furaha, Qonfulka, iyo Ammaanka ee Degmada San Diego (Siyaasadda O.36)

6. Haddii furaha aan islamarkiba la soo celinin, qofka qolka qabtay waxaa laga qaadi doonaa kharash $200 ah oo dib u hagaajinta furaha waxaana lagu darayaa akoonkiisa maktabadda. Haddii uu ku guuldarraysto bixinta waxaa ka dhalanaysa in akoonka loo gudbiyo wakaalada lacagta kasoo qaadda.

7. Dhammaanba codsadeyaashu waa inay haystaan Kaarka Maktabadda Degmada San Diego oo sax ah lana xaqiijiyay ayna buuxiyaan nidaamka qabsashada qolka Bulshada si onleen ah, ayada oo uu kujiro qofka mas'uulka ka ah qabashada qolka, lambarka kaarka maktabadda, iimaylaka lagala xiriirayo iyo lambarka teleefoonka, iyo magaca ururka. Dadka aan awoodin inay si onleen ah u qabsadaan waxay wici karaan laanta si shaqaaluhu ugu qabto qolka.

8. Kaddib markii codsiga onleenka ah la buuxiyo, qabsashada qolku waxay ahaanaysaa mid aan dhammaystirnayn ilaa shaqaalaha maktabaddu ka aqbalayo.

a) Haddii codsigu ka socdo 501(c)(3) ama 501(c)(4), shaqaalaha ayaa ka xaqiijin doona xaaladda ururka https://apps.irs.gov/app/eos/kahor inta uusan aqbalin. Waa in EIN lagu daraa codsiga.

b) Hay'adaha dowladda, bulshada, iyo adeegyada ee aan kujirin 8a waxaa la weydiin doonaa inay codsiga galiyaan magaca ururkooda oo dhammaystiran iyo adeegga ay bixiyaan.

c) Aqbalaadda qabsashada qolka bulshada ee saaxiibada bulshada iyo/ama ururada bulshada waxaa gaar u leh maamuleyaasha laamaha iyo madaxda waaxyaha.

9. Baajinta waa in la sameeyaa ugu yaraan 24 saacadood kahor. haddii baajinta Maktabaddu lagama maarmaan noqoto, dadaal kasta oo suurtagal ah ayaa la smaayn doonaa si codsadaha loogu wargaliyo ugu yaraan 24 saacadood kahor.

Tilmaamaha Isticmaalka

1. Sii qabsashada qolalka waa inaan la samayn wax ka badan 3 bilood kahor iyo wax ka yar 7 bilood kahor.

2. Ogolaanshaha isticmaalka Qolka Bulshada looma wareejin karo urur kale.

3. Kooxuhu waxay Qolka Bulshada isticmaali karaan ugu badnaan hal mar todobaadkii.

4. Kooxuhu waxay usii qabsan karaan Qolka Bulshada kulamo u soconaya ilaa saddex bilood, waa se haddii la heli karo. Kooxuhu waxay halkii marba heli karaan kaliya 12 boos qabsasho.

5. Kooxaha waa inaysan dadka ka qaadin lacag loogu imaanayo ama ku baxaysa adeegga ay bixinayaan. Deeqaha lagu aruuriyo qolka dhexdiisa inta kulanku socdo waa inaan qof gaar ahi ka faa'iidaysan laakiin loo isticmaalaa ujeedooyinka deeqaha ama hagaajinta koox aan faa'iido doon ahayn. Si kataba ha ahaatee, iibinta buugaagta iyo warbaahinta kale ee qoraayaasha ama bandhigeyaasha qaybta ka ah maktabadda waa la ogolyahay.

6. Maktabadda Degmada San Diego ma taageerayso mana meelmarinayso aragtida dadka isticmaalaya qolka kulanka magaca Maktabadda Degmada San Diego-na looma isticmaali karo macluumaadka la qorayo ama xayaysiinta.

a) Dhammaanba xayaysiiska madallada isticmaalaya goobaha lagu kulmo ee Maktabadda waa inay la socotaa afeef ah: "Maktabadda Degmada San Diego ma taageerayso mana meelmarinayso aragtida ama meelaha ay kala taagan yihiin ee ay muujiyaan isticmaaleyaasha goobaheedu."

b) Ciwaanka maktabadda waa la shaacin karaa goobta kulanka ama madasha datood, laakiin lambarka teleefoonka lama shaacin karo maadaama maktabadda aan lagu soo darin shaacinta inay tahay isha macluumaadka madasha darteed.

c) Ururku wuxuu mas'uul ka yahay dhammaanba shaacinta kulankooda ama madashooda waana inuu si waadax ah u cadeeyaa ururka maalgalinaya.

d) Shaacinta/macluumaadka ku dhawaaqaya madasha waa inuu sii ogolaadaa shaqaalaha laanta kahor dhacdada.

7. Ka qaybgaleyaasha layliyada fasalku waa inay saxiixaan waxyaabaha aan ka dhaafayno kahor kulanka.

8. Ammaanka iyo walaacyada dhanka baaxadda ah dartood, maktabaddu ma owooddo inay siiso goob ay wax dhigtaan isticmaaleyaasha Qolka Bulshadu. Ma jiri doonaan alaab la keenayo in wakiil ka socda ururka maalgalinaya uu diyaar u yahay qabashadooda maahane.

9. Tirada ka qaybgaleyaashu waa inaysan ka badan baaxadda loogu tala galay, sida uu soo qoro Madaxa Dabdamisku.

10. Dhammaanba ka qaybgaleyaashu waa inay u hogaansamaan Xeerka Habdhaqanka Degmada San Diego.

11. Cabista sigaarka, qiiqinta, iyo cabitaanka khamriga ah lama ogola, kuwaas oo ay kujiraan madallada sacadaha kaddib ah.

12. qaybinta cuntada iyo cabitaanka ee madallada dadweynaha iyo kulamada waxaa maamusha Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Bii'ada (Department of Environmental Health and Quality (DEHQ). Si cuntada iyo cabitaanka loogu qaybiyo goobaha maktabadda, ururadu waa inay marka koowaad la xiriiraan DEHQ si loo go'aamiyo inay fasax u baahan yihiin iyo in kale. Hadday fasax u baahdaan, waa in lagu muujiyaa meesha laga soo galayo goobta madasho ka dhacayso. Madallada bixinaya waxyaabah qofka firfircoonida galiya laakiin aan uga baahnayn fasaxa waa inay maktabadda siiyaan caddayn ka socota DEHQ taasoo go'aankaan ku saabsan.

a) Kooxda Madasha Kumeelgaarka ah ee DEHQ: fhdtempevents@sdcounty.ca.gov, (858) 505-6809.

b) Goobaha jikada ah ama qalabka ma bixiso maktabaddu, marka laga reebo laamo gaar ah. Jikooyinka Maktabaddu ma ahan goobo la ogolyahay mana lahan meel loogu tala galay in cunto lagu diyaariyo ama alaabta lagu dhaqo waxaana kaliya la isticmaali karaa marka la helo fasaxa shaqaalaha maktabadda.

c) Bacaha wax difaaca ama maryaha miiska la saaro waa in loo isticmaalaa miisaska marka waxyaabah dadka firfircoonida galinaya la isticmaalayo.

13. Heerka Codku waa inuusan waxyelo u gaysan shaqooyinka maktabadda ka socda ama waa inuusan ku xadgudbin shuruucda maxaliga ah waxaana maamuli kara Shaqaalaha Maktabadda.

14. Ururka ayaa mas'uul ka ah diyaarinta qolka iyo inay qolka ka tagaan asaga oo wanaagsan sida uu ku amro Shaqaalaha Maktabaddu. Arintaan waa in la sameeyaa saacadaha ururku qabsaday.

15. Ururada isticmaalaya Qolka Bulshadu waa inay ogolaadaan inay qaataan mas'uuliyadda buuxda ee wax kasta oo ah lumin ama waxyeelayn ku imaan karta dhismaha ama waxyaabaha yaala ee ka baxsan waxyeelooyinka caadiga ah waana inay ogolaadaan bixinta kharashaadka khasaaraha ama waxyeelada noocaas ah islamarkiiba marka lagu wargaliyo. Lacag carbuun ah oo loogu tala galay nadaafadda $200 ah ayaa laga qaadi doonaa koox ama shakhsi walba marka qolka aan lagu soo celin xaalada wanaagsan, ururka mas'uulka ka ahna waxaa dhici karta in mataqbalka loo diido inay isticmaalaan.

Haddii aan islamarkiiba la bixin, lacagahaan waxaa laga raadin doonaa akoonka maktabadda uu ku isticmaalo qofka qabsashada qolka sameeyay. Haddii uu ku guuldarraysto bixinta waxaa ka dhalanaysa in akoonka loo gudbiyo wakaalada lacagta kasoo qaadda.

16. Codsaduhu wuxuu mas'uul ka yahay maamulista habdhaqanka dhammaanba kasoo qaybgaleyaasha. Maktavaddu waxay codsadaha ka dooni kartaa inuu bixiyo adeegyo ammaan oo ku filan. Caymis ayaa looga baahan karaa. Korjoogtaynta qof weyn ayaa looga baahan yahay koox walba oo saqiiro ah oo ka yar da'da 18 sanno. Dhaqan xumada ay sameeyaan ka qaybqaateyaashu, ku guuldarraysiga u hogaansamidda shuruucdaan, iyo/ama ka beensheegista codsiga waxaa ka dhalanaysa diidmada codsiga ururka iyo/ama in mustaqbalka loo siido isticmaalkeeda.

17. Agaasimaha Maktabada ayaa leh awoodda kama danbaysta ah ee dhammaanba waxyaabah khuseeya isticmaalka Qolka. Agaasimaha Maktabaddu ama wakiilka loo xilsaaray wuxuu ka dhaafi karaa qayb kamid siyaasadaan haddii baahi gaar ah timaaddo.

(la muraajiceeyay 9/1/2023)